# Baadhista Maqalka Dhallaanka
# XAASHIDA XAQIIQDA

**Newborn Hearing Screening Fact Sheet — Somali**



## Waa maxay baadhista maqalka dhallaanka?

Baadhista maqalka ee dhallaanku waa shaybaar ka hubiya dhallaanka heerarka maqalka ee ka baxsan heerka caadiga ah.  Waa mid ka mid ah baadhitaanada saddexda ah ee dhallaanka ee la qaban doono isla dhalmada kadib, oo ay la socdaan baadhitaanda dhiigga iyo garaaca wadnaha iyo ogsajiinta.

Baadhista dhiigga

Baadhitaanka garaaca wadnaha iyo ogsajiinta

Baadhitaanka Maqalka

## Waa maxay sababta baadhitaanka maqalku muhiim u yahay?

Waa muhiim in la ogaado kala duwanaanshaha maqalka sida ugu dhaqsaha badan sababtoo ah hadalka iyo luqaddu waxay bilaabmaan inay dhismaan xiliga dhalashada. Ilmaha leh heerarka maqalka ee ka baxsan heerka caadiga ah waxaa laga yaabaa inay ku adkaato hadalka iyo luqadda hadii aanan la helin gargaar hore. Haddii ilmuhu leeyahay heerar maqal oo ka baxsan heerka caadiga ah, badanaa lama dareemo waalidiinta ama bixiyeyaasha sababtoo ah qaar badan oo ka mid ah dhallaankan ayaa ku naxo dhawaaq dheer oo xitaa u muuqda inay dhegaystaan. Eegmadan leh baaritaanka dabagalka ayaa ah habka kaliya ee lagu heli karo heerarka maqalka ee ka baxsan inta caadiga ah goor hore. Barashada in ilmahaagu leeyahay heerarka maqalka ee ka baxsan heerka caadiga ah inta ay yaryihiin waxay kaa caawin doontaa adiga iyo ilmahaaga inaad heshaan hababka ugu fiican ee aad kuwada xidhiidhtaan.

## Sidee iyo goorma ayaa la baadhi doonaa maqalka ilmahayga?

Si ka duwan baadhitaanka maqalka ee carruurta waaweyn iyo dadka waaweyn, baadhista maqalka dhallaanka uma baahna ka qaybqaadashada firfircoon ee ilmahaaga. Taa baddalkeeda, qalab yar oo baadhiseed ayaa samayn doona dhawaaqyo jilicsan inta uu cabbirayo sida dhegta gudaha ee ilmahaaga ama neerfaha maqalka u jawaabayo. Labada dariiqo ee hadda loo isticmaalo baadhista maqalka dhallaanka waa soo saarista otoakoostik (OAE) iyo jawaab celinta maskaxda dhegta oo toos ah (AABR). Wixii faahfaahin ah ka eeg dhinaca danbe.

Baadhitaanka waa in loo sameeyaa sida ugu dhaqsiyaha badan oo sida ugu wanaagsan loo dhammeeyo kahor inta uusan dhallaanku gaarin hal bil. Haddii ilmahaagu ku dhasho cisbitaal, waa in la sameeyaa shaybaarka hore kahor inta aanad adiga iyo ilmahaagu aadin guriga. Baadhitaanka maqalka ayaa sida ugu wanaagsan loo sameeyaa marka ilmahaagu deggen yahay, si fiican loo quudiyo, oo uu raaxaysanayo.

## Maxey ka dhigan tahay natiijada?

Haddii ilmahaagu helo natiijada GUDBAY, baadhistu waxay muujinaysaa in maqalka ilmahaagu caadi yahay wakhtigaas. Sababtoo ah maqal la’aantu waxay dhici kartaa wakhti kasta inta lagu jiro nolosha qofka, si kastaba ha ahaatee, waa muhiim inaad kala hadasho bixiyaha ilmahaaga wixii walaac ah ee ku saabsan maqal la’aanta ama marxaladaha hadalka ee ka maqan.

Haddii ilmahaagu helo natiijada WAREEJIN (REFER)/aanu gudbin, baadhistu waxay muujinaysaa in baadhitaan dheeraad ah loo baahan yahay si loo hubiyo in ilmahaagu maqlayo dhammaan dhawaaqyada muhiimka u ah hadalka iyo dhismaha luqadda. Bixiyahaaga ayaa kaa caawin doona qabanqaabinta ballan dabagal ah sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.

## Sidee OAE iyo AABR u shaqeeyaan?

OAE, caaro rabadh ah oo jilicsan ayaa la geliyaa dheg kasta waxay bixisaa codad dabacsan waxayna cabbirtaa dhawaaqa dhacaya marka dhegtu si caadi ah u shaqayso. AABR, sameecadaha dhegaha ayaa sii-daaya dhawaaqyada tijaabada. Dareemayaasha la saaray madaxa iyo qoorta ilmaha ayaa cabbira sida dareenka maqalka ilmuhu uga jawaabo dhawaaqyadaas. Labadaba OAE iyo AABR, kombuyuutarku waxa uu cabbiraa haddii natiijadu tahay PASS (GUDBAY) ama REFER(WAREEJIN)/aan gudbin.

### Ogaanshaha Maqalka Goor Hore iyo Barnaamijka Wax-ka-qabadka

Barnaamijka Ka-hortagga iyo Ogaanshaha Hore ee Maqalka (EHDI) wuxuu gacan ka gaystaa aqoonsiga ilmaha dhashay iyo dhallaanka leh ama khatarta ugu jira inay yeeshaan heerarka maqalka ee ka baxsan heerka caadiga ah wuxuuna ku hagaa qoysaska adeegyada ku habboon.

Hadafka barnaamijka EHDI waa in dhammaan dhallaanku helaan:

- maqalka oo la baadho da'ada 1 bil
- qiimaynta ogaanshaha kahor da'ada 3 bilood
- adeegyada wax-ka-qabadka hore ee la bilaabay kahor da'ada 6 bilood

1 Baadhitaan — 3 Ogaansho — 6 Wax-ka-qabad

Websaydka barnaamijka EHDI ee Minnesota waxa uu siiyaa kheyraad waalidiinta, bixiyayaasha, iyo xirfadlayaal kale. Waalidiintu waxay wax ka baran karaan habka EHDI, waxay heli karaan agab ka caawiya inay ku hagaan qiimaynta heerarka maqalka dhallaanka, agabka faragelinta hore, iyo inay deegaankaaga ka helaan khabiiro maqal iyo agab waxbarasho. Boggu waxa kale oo uu bixiyaa macluumaad ka caawinaya waalidiinta in ay ku xidhmaan nidaamka taageerada qoyska iyo beesha laga heli karo gudaha.

## MA OGTAHAY?

SANAD KASTA, KU DHAWAAD
**1 kiiba 300 OO ILMO AH**
EE KU SUGAN MINNESOTA
AYAA KU DHASHO HEERAR MAQAL EE KA BAXSAN XADKA CAADIGA AH
EE LAGU OGAAN KARO BAADHITAANKA MAQALKA DHALLAANKA.



### Su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan baadhitaanka?

Xor ayaad u tahay inaad wacdo Barnaamijka Baadhista Dhallaanka (800) 664-7772* ama nagu soo booqo onlaynka: www.health.state.mn.us/newbornscreening ama www.improveehdi.org/mn

**turjumaano ayaa diyaar ah*

DEPARTMENT OF HEALTH

REV: 2/2025 ID# 53323-SO

Barnaamijka Baadhitaanka Dhallaanka Cusub ee Minnesota (Minnesota Newborn Screening Program) | www.health.state.mn.us/newbornscreening
P.O. Box 64899, St. Paul, MN 55164
Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale:
La xiriir health.newbornscreening@state.mn.us
ama wac (800) 664-7772 ***turjubaano ayaa la heli karaa***